Göteborgs grundskoleförvaltning

Göteborgs Stad

# Ku soo dhawaada iskoolka!





## Bogga goteborg.se/grundskola ayaad ka heleysaa xog dheeri ah

Ku soo dhawaaw iskoolka! Xirmadan qoraallada ah waxaan ku ururinnay waxyaabo ay fiicnaan karto in aad ogaato ka hor inta uusan canuggaagu iskoolka billaabin dayrta soo socota.

Waxaad xirmada oo luqado kala duwan ah iyo macluumaad kale ka heleysaa bogga www.goteborg.se/borjaskolan

Waxaa la gaaray waqtigii uu ilmahaagu iskool billaabi lahaa.
Dayrta soo socota qiyaastii 6000 oo carruur ah ayaa billaabi doona fasalka dugsiga xannaanada oo hadda u isu diyaarinaya waqtigan cusub oo aadka u xiisaha badan!

Laakin maaha carruurta oo keliya cidda qabta su'aalo iyo waxyaabo ay is-weydiineyso ka hor inta uusan iskoolku billaaban. In isbeddelka soo socda ka hor la dareemo kalsooni waxay si isku mid ah muhiim u yahay adiga iyo canuggaaga awgiis. Macluumaadkan, waxaan rabnaa inaan wax badan kaga warranno waxa aan annagu, haddaanu nahay dugsiyada hoose-dhexe ee magaalada Göteborg, idin siin karnaa adiga iyo canuggaaga.

Haddaanu nahay maamulka dugsiyada hoose-dhexe, waxaan rejeyneynaa in adiga iyo ilmahaagu aad dareemi doontaan soo dhawayn diirran iyo inaad diyaar u tihiin iskool billaabidda.

# Ku soo dhawaaw iskoolka!



# Muxuu ka dhiganyahay fasal dugsi xannaano?

Haddii si fudud loo dhaho waxaa fasalka dugsiga xannaanada lagu tilmaami karaa inuu yahay isku-dhaf u dhexeeya hababka waxbaridda iyo qaababka shaqada ee dugsiyada xannaanada iyo iskoollada. Waxbarashada fasalka dugsiga xannaanada waxaa lagu sii dul dhisayaa wixii uu ilmahaagu ka bartay dugsiga xannaanada. Laakiin waxaa sidoo kale ilmahaaga lagu tirtirsiin doonaa in uu isku dayo inuu ogaado oo uu barto waxyaabo cusub oo uu sidaas ugu diyaargaroobo inuu sii wato waxbarashadiisa iskoolka.

Waxay waxbariddu kobcin doontaa male-awaalka, dareenka iyo awoodda ilmahaaga ee uu dadka kale wax kula baran karo. Waxaan taas ku sameyneynaa ciyaar, dhaqdhaqaaq, sahmin iyo habab shaqo oo la taaban karo. Waxay hawshu soconeysaa ugu badnaan lix saacadood maalintiiba.

Haddii uu ilmahaagu qabo naafanimo xagga garaadka oo fasalka dugsiga xannaanadu uusan ahayn doorashada ugu fiican, waxaad codsan kartaa in waajibka iskool dhigashada dib loogu dhigo ama uu iskool billaabo waqtigiisi ka hor.

In la dhigto fasal dugsi xannaano, dugsi hoose-dhexe iyo dugsiga carruurta baahida gaarka ah qabta waa lacag la’aan.

# Ilmahaagu firiitiidka boos ma uga baahanyahay?

Haddii aad shaqeyso ama aad wax barato, wuxuu ilmahaagu joogi karaa firiitiidka waqtiga iskoolka ka hor, ka dib ama labadaba. Waxaa xitaa dhici karta in xaalado kale ay ardaydu boos xaq ugu yeeshaan iyadoo ay ugu wacantahay xaaladda qoyska ama baahida ardayga awgeed. Tusaale ahaan, haddii uu ilmuhu u baahanyahay taageero ku aaddan barashada af-Iswidhishka ama uu qoysku degganyahay meel aad ciriiri ah.

Waxbaridda firiitiidka iyo fasalka dugsiga xannaanadu way isu egyihiin inta badan, laakiin waxbaridda firiitiidku waa in ay sidoo kale noqotaa mid dhammaystir u ah fasalka dugsiga xannaanada.

**Firiitiid codso 31 Mey ka hor, wixii dheeri ah ka akhriso bogga goteborg.se/fritidshem**



# Inta uusan ilmahaagu iskoolka billaabin ka hor

Waxaa jira wax badan oo idinku cusub adiga iyo ilmahaaga labadaba, marka la gaaro waqtiga la billaabayo iskoolka.

## Kulan macluumaad oo loogu tala galay waalidiinta

Iskoolka ilmahaaga ayaa kugu martiqaadi doona kulan macluumaad, iskool billaabashada ka hor. Inta uu kulanku socdo, waxaad heli doontaa macluumaad ku saabsan fasalka dugsiga xannaanada iyo firiitiidka ee iskoolka mustaqbalka ee ilmahaaga. Kulanka macluumaadku wuxuu dhacayaa qaybta dambe ee guga.

## Ilmahaagu wuu booqan karaa iskoolkiisa cusub

Inta uusan iskoolka billaabin ka hor, ilmahaagu wuu booqan karaa iskoolkiisa cusub ugu yaraan hal mar. Waxay taasi dhacaysaa inta lagu jiro qaybta dambe ee guga. Haddi ay suurtagal tahay, macalin dugsi xannaano ook a  socda dugsiga xannaanada ee ilmahaaga ayaa u raacaya booqashada ama booqashooyinka. Laakiin haddii aysan taasi soconeyn waad raaci kartaa adigu beddel ahaan.
In la booqdo fasalka dugsiga xannaanada iyo firiitiidku waxay sahleysaa oo ay ammaan ka dhigeysaa u gudbidda canuggaaga ee iskoolka.



## Wadahadal soo dhaweyn ah oo, ka waalid ahaan, adiga laguugu tala galay

Waxaa laguugu casuumi doonaa wadahadal soo dhaweyn ah oo aad la yeelanyso macallinka cusub ee ilmahaaga. Wadahadalka soo dhawayntu wuxuu dhacayaa inta aanu iskoolku billaaban ka hor ama marka uu ilmahaagu hadda billaabay iskoolka, micnaha waqti u dhaxeeya Juun iyo Sebteembar.

Inta uu wadahadalku socdo, waxaad fursad u heli doontaa in aad ka warranto ilmahaaga iyo in aad waydiiso su'aalo ku saabsan sida uu iskoolku ugu socdo ilmahaaga. Ilmo kastaa waa gaar, waxaana kulankan loogu tala galay isbarasho iyo in lagu ogaado waxa uu canuggaagu u baahan yahay si uu kalsooni u dareemo inta uusan iskoolka billaabin ka hor.

Mararka qaar wuxuu iskoolku u baahan karaa in uu hadba xaaladda waafajiyo baahida ilmahaaga. Haddii uu ilmahaagu u baahanyahay xaalad waafajin gaar ah, waa muhiim in uu iskoolku taas ogaado waqti fiican ka hor. Haddii ay sidaas tahay weydiiso dugsiga xannaanada ee ilmahaaga in uu noo soo sheego ama sida ugu dhakhsida badan ee suurta galka ah, adigu ula xiriir iskoolka.

Inta uu socdo wadahadalka soo dhaweyntu, waxaad heli doontaa xog ku saabsan sida ay u ekaan doonaan maalmaha ugu horreeya ee iskoolku.



# Sidee bay u wax u socdaan fasalka dugsiga xannaanada iyo firiitiidka?

## Keenidda iyo wadidda

Wuxuu cunuggaagu joogi doonaa fasalka dugsiga xannaanada waqtiyo go'an. Haddii uu ilmahaagu maalintii iskoolka ka hor iyo/ama ka dib xannaano u baahanyahay, iyadoo ay taas ugu wacantahay in aad shaqeyso ama waxbarato, waxaad markaas keeneysaa, kana/ama ka wadaneysaa ilmaha firiitiidka.

Ilmahaagu waa inuu maalinta oo dhan dareemaa kalsooni, waana sababtaas sababta ay macallimiintu ula jirayaan waqtiga kala guurka ah ee u dhexeeya fasalka dugsiga xannaanada iyo firiitiidka.

## Cuntooyinka iskoolka

Ardayda oo dhan qado bilaash ah ayey iskoolka ka helayaan. Haddii uu ilmahaagu leeyahay firiitiid iskoolka ka hor ama ka dibna wuxuu ilmuhu sidoo kale helayaa quraac iyo cunto dhextaal. Haddii uu ilmahaagu u baahanyahay cunto xaaladdiisa la waafajiyay ama cunto gaar ah oo uu tusaale ahaan qabyo xasaasiyad ama dulqaad la'aan, waa inaad la hadashaa shaqaalaha iskoolka si aad u sameyso codsi. Badanaa, hey'adaha caafimaadka ayaa marka hore baaraya baahiyaha ilmahaaga. Uma baahnid inaad codsato cunto gaar ah ama cunto xaaladda ilmaha waafaqsan si uu u helo cunto khudradeed ama cunto aan hilib doofaar ku jirin iskoolka.

Lama oggola in iskoollada Göteborg lala soo galo noocyada kala duduwan ee looska iyo sisinta.

## Dhar waafaqsan cimilada iyo dhaqdhaqaaqa

Qayb ka mid ah waxbaridda fasalka dugsiga xannaanada iyo firiitiidku waxay ku saabsan tahay in ardayda fursad loo siiyo in ay yeeshaan dhaqdhaqaaq jeceyl iyo in lagu dhiirrigeliyo in ay hadba wax cusub ogaadaan.

Sidaas darteed, wuxuu ilmahaagu u baahanyahay dhar ku habboon hawlaha kala duwan ee gudaha iyo dibadda labadaba, iyada oo aan taas loo eegayn xilliga sanadka iyo cimilada. Sidoo kale maskaxda ku hay in uu ilmahaagu iskoolka ugu baahanyahay dhar uu dharka ku beddesho haddii uu ilmuhu u baahdo inuu dharka ku beddesho dhar qallalan oo nadiif ah maalinta gudeheeda.



## Taageerada afka hooyo iyo dhigidda afka hooyo

Haddii uu ilmahaagu leeyahay af hooyo oo aan iswiidhish ahayn fasalka dugsiga xannaanada iyo firiitiidku waa inay gacan ka geystaan sidii ilmahaagu u heli lahaa fursad uu ku hormariyo luqadda Iswiidhishka iyo afkiisa hooyo labadaba. Waxay taasi dhacdaa iyadoo ay macallimiintu siyaabo kala duwan hawl-maalmeedka ugu dhex muujinayaan, daneynayaanna afka hooyo ee ardayga.

Barashada afka hooyo waxaa la bixiyaa laga bilaabo fasalka 1aad. Waxay tani khusaysaa luqadaha oo dhan marka laga reebo luqadaha laga tirada badanyahay ee qaranka halkaas oo magaalada Göteborg ay bixiso barashada afka hooyo laga billaabo fasalka dugsiga xannaanada.

## Caymis

Dhammaan ardayda ka diwaangashan Göteborg waxay ku jiraan caymis loogu tala galay shilalka, habeen iyo maalinba, ilaa ay ka buuxinayaan da’da 17 jirka. Wuxuu caymisku daboolayaa oo kaliya shilalka.

## Vklass

Vklass-ka ayaad adigu ka arday ahaan iyo waalid ahaanba uga warhaynaysaa wax walba oo ku saabsan iskoolka. Vklass-ka waxaad tusaale ahaan kula socon kartaa horuumarka aqoonta, ku soo sheegi kartaa maqnaashada, kuna heli kartaa xogta ka timaada iskoolka.

## Iskool u qaadid iyo kaar iskool

Dhammaan ardayda fasallada dugsiyada xannaanada, dugsiyada hoose-dhexe iyo dugsiyada hoose-dhexe ee carruurta baahida gaarka ah qabta ee ka diwaangashan Göteborg waxay helayaan kaar iskool oo lacag la’aan ah oo ka shaqeynaya gudaha Göteborg, iyadoon taas loo eegayn masaafada u dhaxaysa guriga iyo iskoolka. Iskool, tusaale ahaan taksi ugu qaadid, waxaa heli kara ardayda baahiyaha gaarka ah qabta.



## Xilli dugsiyeedyada iyo fasax-dugsiyeedyada fasalka dugsiga xannaanada

Sannad-dugsiyeedku wuxuu u qaybsanyahay laba xilli-dugsiyeed – xilli-dugsiyeedka dayrta iyo xilli-dugsiyeedka gu'ga. Dhammaan iskoollada degmada ee Göteborg waxay leeyihiin sannad-dugsiyeed isku mid ah. Waxay taasi ka dhigantahay in isku hal maalin la wada billaabayo, isku hal maalin la wada dhammaynayo, fasax dugsiyeedkana isku hal mar la wada qaadanayo. Firiitiidku xitaa fasax dugsiyeedka wuu u furanyahay ardayda firiitiidka ee xannaanada u baahan.

**Ma ogayd in...**

Carruurta oo dhan uu iskool ku waajibayo laga billaabo xilli dugsiyeedka dayrta ee ay lix sano buuxinayaan. Waxay taasi ka dhigantahay in ay waajib tahay in la dhigto fasalka dugsiga xannaanda.




## Haddii uu xanuun jiro, waa inuu ilmahaagu guriga joogaa

Haddii uu ilmahaagu buko, waa inaad jirro ku qortaa ilmaha. Macluumaad ku saabsan sida loo soo sheego ilmaha buka waxaad ka heleysaa macallinka iskoolka.

## Codsashada fasaxyada gaagaaban

Fasalka dugsiga xannaanada waa waajib in la joogo. Waxay taasi ka dhigantahay in ay qasab tahay in uu ilmahaagu casharrada oo dhan ka qayb qaato. Laakin ilmahaagu wuu heli karaa hal ama dhawr maalmood oo fasax ah haddi ay jirto sabab, tusaale ahaan munaasabad qoys ama ciida-diimeedyo.

Waa maamulaha iskoolka cidda qiimeyneysa in uu ilmahaagu fasax ka heli karo fasalka dugsiga xannaanada iyo in kale. Haddii aad rabto inaad fasax codsato, waa inaad buuxisaa foom.



# Muxuu yahay maamulka dugsiyada hoose-dhexe?

Maamulka dugsiyada hoose-dhexe wuxuu mas'uul ka yahay hawlaha dugsiyada hoose-dhexe ee magaalada laga billaabo fasalka dugsiyada xannaanada ilaa iyo fasalka sagaalaad, dugsiyada hoose-dhexe ee carruurta qabta baahida gaarka ah iyo firiitiidyada. Waxaan wadajir uga shaqaynaa si aan ardayda iskoollada Göteborg oo dhan ugu abuureyno duruufo aad u wanaagsan oo ay fursad ugu helaan in ay dhistaan nolol wanaagsan.

**Waxaan u wadda xaareynaa iskoollada mustaqbalka.**

# Ma jiraan waxyaabo aad is-weydiineyso?

Haddii ay sidaas tahay nagala soo xiriir:

**Telefoon**
031-365 09 60 (kontaktcenter)

**E-mail**
grundskola@grundskola.goteborg.se

**Waxaad xitaa xog dheeri ah ka heleysaa bogga**
goteborg.se/grundskola

Grundskoleförvaltningen Göteborgs Stad 2024